

OGOW XUQUUQDA AAD

DADKA KALA SIMAN TAHAY



OGOW XUQUUQDA AAD DADKA KALA SIMAN TAHAY (KNOW YOUR RIGHT TO FAIR TREATMENT)

Department of Employment and Economic Development (Waaxda Shaqada iyo Horumarinta Dhaqaalaha ama DEED) waxaa ka go'an in ay dadka wada siiso fursado loo siman yahay iyo helitaanka barnaamijyada iyo adeegyada ka jira Minnesota. Waxaad xaq u leedahay in ay shaqaaluhu kuula dhaqmaan si ah caddaalad iyo sinnaan oo waxaad xaq u leedahay in aad cabasho u dirsan karto federaalka, gobolka, ama deegaanka maamulkooda sinnaanta fursadaha haddii aad aaminsan tahay in lagu takooray.

DEED waxa ay takooridda ka mamnuucday barnaamijyadeeda wixii ku saleysan isir, midab, diin, jinsi (sida haweenka uurka leh, ilmaha la dhalayo, iyo xaaladaha caafimaadka la xiriira, dhibaataada jinsiga, xaalad ah beddelasho jinsiyeed, iyo aqoonsiga iyo muujinta jinsiyeed), asalkii hore (sida afka Ingiriiska in aan la aqoon), da', naafanimo, ama fikrad siyaasadeed ama wax la aaminsan yahay, ama, wax ah manaafacaad la qaato, marka la codsado, ama marka laga qeybqaato barnaamijyada taageerada dhaqaalaha sida uu dhigayo Xuquuqda 1 ee Sharciga Taageerada Hal-abuurka iyo Fursadaha Shaqada, iyadoo lagu saleynayo xaalad ah dhalasho uu qof haysto ama in laga qeybqaato Xuquuqda 1 ee WIOA oo ah barnaamij ama hawl dhaqaale oo si degdeg ah la isugu caawiyo.

Qofkaad la Soo Xiriireyso Markaad Dareento in Takoorid Lagugu Sameeyey

Waxaad soo codsan kartaa foomka gudbinta cabashashada ama waxaad la hadli kartaa madaxda hoose ee fursadaha loo siman yahay:

- ✓ **Deegaanka aad ku nooshahay fursadaha loo siman yahay Maamulkooda** – waxaad ka heli kartaa macluumaadka Ogeysiisyada Sinnaanta Fursadaha waraaqaha ku dheggaan darbiyada WorkForce Center ama waxaad weydiisan kartaa shaqaalaha miiska soo-dhaweynta.
- ✓ **Office of Diversity and Equal Opportunity (Maamulaha Isku-dhafnaanta Bulshada iyo Sinnaanta Fursadaha ama ODEO)**
 - » Boostada intarnetka: DEED.ODEO@state.mn.us
 - » Taleefanka: 651-259-7094

Xafiisyada Kale ee Muhiimka ah

Department of Labor's Civil Rights Center (Xarunta Xuquuqda Madaniga ah ee Waaxda Shaqada ama CRC)

Haddii aadan ku qanacsanayn marka loo eego sida cabashadaada gudaha loogu maareeyay, waxaad xaq u leedahay in aad cabashadaada u gudbisato Department of Labor's Civil Rights Center (Xarunta Xuquuqda Madaniga ah ee Waaxda Shaqada ama CRC).



Department of Labor's Civil Rights Center (Xarunta Xuquuqda Madaniga ah ee Waaxda Shaqada ama CRC)

Agaasimaha, Civil Rights Center (Xarunta Xuquuqda Madaniga ama CRC), U.S. Department of Labor
200 Constitution Avenue NW, Room N-4123, Washington, DC 20210
Waxa kale oo aad barta intarnetka ee CRC ka heli kartaa www.dol.gov/crc.

Minnesota department of human rights (Waaxda Xuquuqda Aadanaha Minnesota ama MDHR)

Minnesota department of human rights (Waaxda Xuquuqda Aadanaha Minnesota ama MDHR) waxa ay mamnuucday takoorid in la isugu sameeyo barnaamijyada adeegyada dadweynaha sababta oo ah isir, midab, caqiido, diin, asalkii hore, naafanimo, jinsi, dookh lammaane, ama xaalad ah qaadashada kaalmo dowladeed. Waxaad MDHR kula soo xiriiri kartaa taleefan, waraaq, ama in aad u timaaddo.



Minnesota department of human rights (Waaxda Xuquuqda Aadanaha Minnesota ama MDHR)

Griggs Midway Building, 540 Fairview Ave. North, Suite 201
St. Paul, MN 55104
Boostada Intarnetka: info.MDHR@state.mn.us
St. Paul Taleefannada Xafiiska: 651-539-1100
ama 1-800-657-3704
Waxa kale oo aad barta intarnetka ee MDHR
ka heli kartaa www.mn.gov/mdhr.

OGOW
XAQUUQDAADA!





Minnesota's Career Resource

Waxay iskaashi ah wada-shaqeyn la leedahay
American Job Center Network (Xarunta Shaqada ee
Mareykanka)

MN.GOV/DEED

Goobaha DEED iyo Minnesota CareerForce waa meelo loo siman yahay sida looga helayo fursado kala ah shaqada iyo adeegyada.

Macluumaadkan waxaa lagu heli karaa qaabab kala duwan oo loogu talagalay dadka naafada ah iyaga oo soo garaaci kara 651-259-7094 (duubista fariin) ama iyada oo la adeegsanayo habka taleefanka ee dadka dhegoolaha ah ama dhegaha culus.